





Hordhac

- Inkastoo dalku leeyahay meelo ku wanaagsan daaqa iyo beeraha, hadana waa lama degaan xigeen cimiladiisu kulushahay.
- Dhanka bariga iyo waqooyiga, waa dhul isugu jiro, mid hooseeyo, ban iyo buuro, mana ahan mid ku wanaagsan beeraha. Waloow ay jiraan toggag waawayn oo xili roobaadka ay dadka iyo duunyaduba biya ka helaan, hadana goboladaan waa kuwo ku tiirsan biyaha dhulka hoostiisa laga soosaaro (ceelasha dhaadheer).
- Wabiyada jubba iyo shabeele oo ah kuwa qura ee uu dalku leeyahay, ayaa dhex qul-qula gobolada koonfureed ee dalka. Waana gobalada ugu badan dhanka wax soosaarka beeraha. Sidookalana ku wanaagsan daaqa, waana meelaha ugu dhirta badan dalka.
- Cimilada dalka oo aad u kulul awgeed, heerkulka ayaa gaara inta u dhaxayso 28-48 derajada **celcius**.
- Guga iyo deyrta oo kamid ah afarta xili (gu', xagaa, deyr iyo jiilaal) ee sanadka loo qaybiyo ayaa ah xili roobaadyo aad loogu tashado, oo haddii circa roob laga waayo, abaar la fisho.
- Abaaraha, fatahaadaha iyo daadadka ayaa ah musiibooyinka dabiiciga ah ee dalka ku soo noq-noqda, ayagoo lala xiriiriyo ama loo sababeeyo isbadalka cimilada.





Roob di'ii sanadkii tagay

Sida ka muuqata jaantuska hoose, sanadkii dhamaaday, ayaa ahaa mid uu aad u yaraa roob di'iisa, oo celcelis ahaan ka yaraa bishii 70 mm. Taa soo sababtay in meela badanoo dalka kamid ah ay ku dhufaan abaaro saameeyay dad iyo duunyaba.



Xogta Roobka 1981-2021

Sida jaantuska hoose uu sharaxayo, marka la eego macluumaadka 40 sanoo roob da' ah, sanadahii 1984 iyo 2021 ayaa ah laba sanadood oo aad isugu eg dhanka roob yarida iyo qalalnaanta. Sidookale xili roobaadyada guga iyo dayrta ee sanadkii tagay (2021) ayaa ah kuwa aad u hooseeyo marka la bar-bar dhigo macluumaadka



Xaaladda Abaaraha



Roobabki Guga iyo Deyrta oo aad u yaraa sidi larabayna aanan u di'in, deegaanno badanoo dalka ah waxaa ku dhufatay abaar daran oo dad iyo duunyaba saamaysay. Gobolada jubbooyinka, Gedo, Bay, Bakool iyo gobolada dhexe ayay abaaruhu aad u saameeyeen. Kumanaan ayaa deegaanadoodi ka hayaamay ayagoo raadinayo biyo iyo baad. Halka tiro badanoo xoola ah ay ku li'deen.



Jubada hoose: Neef geel ah oo wuxuu qaado ka waayay dhulka, abaarta jirta awgeed.

Xuquuqda sawirka: Wariye Cabirisaq Catoosh

Biyo Yari



Abaarta daran ee dalka ka jirta ayaa sababtay in biyuhu noqdaan kuwo gabaabsi ah, deegaanada qaarna biya la'aan looga hayaamo. Biyaha dhulka guntiisa laga soosaaro oo ah kuwa bulshadu aad ugu tiirsantahay ayaa hoos u dhac wayn ku yimid kadib roob la'aan is xig-xigtay. Sidookale wabiyada jubba iyo shabeelle ayaa iyaguna biya yareeyay.



Gedo: Tiro dad ah oo abaarta saamaysay oo ku xoosan biyo yaroo back u jiro

Xuquuqda sawirka: PYGO-Organization

Dadaaladii Wax Looga qabanayay Abaaraha

Dadaalo ay hormuud u ahayd dawladda fadaraalka Soomaaliya, ayna qayb ka ahaayeen bulshada Soomaaliyeed, hay'adaha maxaliga ah, urudada bulshada iyo hay'ado caalami ah looga jawaabayay abaaraha ku dhufatay deegaanno badanoo dalka ah ayaa lagu gaarsiiyay kaalmooyin kala duwan dadkii ay abaaruhu wax yeeleeyeen. Wasaaradda tamarta iyo kheyraadka biyaha oo kaashaynso bah wadaagteeda ayaa gaarsiiyay biyo nadiif ah dadkii iyo duuyadi ay abaartu saamaysay.

Gunaanad

Roob di'ii dalka ee sanadkii tagay (2021) wuxuu ahaa mid aad u hooseeyay marka loo eego sanadihii isaga ka horeeyay. Macluumaadka ay waxda saadaasha iyo cabbirka biyaha soo uruurisay siodoo kalana ay taxliilisay, wuxuu muujinayaa in sanadkii tagay uu aad ugu egyahay sanadkii 1984, dhanka roob yarida, kulaylka iyo qalalnaanta.